



KHULAASADA FULINTA EE Nuqulka 2.0

ABUURISTA QORSHAHA BADQABKA SHAQADA MUDADA FOG DUGSIYAD DPS EE DEGMADU MAAMUSHO

Guudmarka Nuqulka 2.0

Waxaan idiin kaga mahadcelinaynaa dhammaantiin bulshadeena jawaab celinta balaaran ee aad ka bixiseen Nuqulkii 1.0. Waxaan ka hadalnay dhawr mawduuc oo ku saabsan labadaba qaabka iyo xogta ee aan uga jawaabnay Nuqulka 2.0. Khulaasada isbadeladaas ayaa hoos ku qoran.

Cadayn

Waxaan doonaynaa inaan qeexitaan dheeri ah ka bixino waxa hadda ka socda dugsiyada iyo waxa la qorsheeyay mustaqbalka. Nuqulka 2.0, waxaad ku arkaysaa xaalada hadda iyo xaalada mustaqbalka oo si cad loo qeexay.

Iswaafajinta

Waxaan muhiimad wayn saaraynaa inaan si cad u sheegno qaybaha qorshaha badqabka ee ay tahay in laga dhaqan gasho dhammaan dugsiyada iyo sida aan doonayn inaan u xaqiijino in dhammaan xubnaha shaqaalaha si ku haboon loo tababaro. Waxaan sidoo kale kula xisaabtamaynaa dhammaan dugsiyada abuurista faylka qorshaha badqabka guud iyo qorsheyaasha shaqaalaha xaaladaha degdega ah.

Hufnaan

Waxaan muhiimada saaraynaa adeegsiga qorshahaan, iyo nuqllada imaan doona, si aan si buuxda ugu dhaqan gelino talaabooyinka badqabka ee ka jira dhammaan dugsiyada iyo dhismeyaasha DPS. Waxaan sidoo kale aqoonsan nahay in ay jirto xog ku saabsan qorsheyaashaan oo ay qasab tahay inaan dadwaynaha lala wadaagin si loo ilaaliyo badqabka.

Guudmarka Mawduucyada Muhiimka ah ayadoo la raacaayo Fikradaha Laga Baxshay Nuqulka 1.0

- Xaalada hadda iyo xaalada mustaqbalka
 - Nuqulka 2.0 ayaa sharxaaya waxa hadda diyaarsan iyo waxa la qorsheeyay loona dejiyay miisaaniyada mustaqbalka
- Talooyinka SRO <Xaalada Nidaamka ay Maamusho DPS>
 - Waxaa laga baxshay fikrado kaladuwan mawduuca SRO-yada ee ay dhiibteen dhammaan bulshadu. Kadib tixgelin dheeraad ah, wuxuu kula talinayaa Kormeeraha Guud Dr. Alex Marrero Gudiga Waxbarashada in Gudiga Waxbarashu ay go'aan degmada oo dhan ah ka soo saaraan SRO-yada kuwaasoo qabanaaya dugsiyada sare ee waawayn iyo dugsiyada fasallada 6-12.
- Tallada baarista hubka <Xaalada Nidaamka ay Maamusho DPS>

- Fikradaha laga dhiibtay baarista hubka ayaa sidoo kale kala duwanaa. Waan ognahay in nidaamka baarista hubka uu yahay keliya hal qayb oo kamid ah istaraatiijiyada badqabka waxaana sii wadnaa inaan raadino dookhyada ugu fiican, ee ugu waxtarka wanaagsan. Go'aaminta nidaamka sheega hubka ee la dhigaayo dugsiga ama dhismaha degmada ayaa noqon doona go'aan xarunta lagu gaaro ayadoo si wayn loogala tashanaayo bulshada.
- Cabirka edaabta <Xaalada Nidaamka ay Maamusho DPS>
 - Istaraatiijiyada anshaxa ardayda ee Dugsiyada Dowladda ee Denver ayaa sii wadaaya in ay ku dhisanaadaan ayna waafaqsanaadaan sharciga heer federaal iyo heer gobal, iyo markasta oo suuragal tahayba, shaqadaan ayaa loo dhaqan gashaa si waafaqsan mabaadii'da aasaasiga ah ee degmada, ayna ku jiraan in Muhiimada Koobaad la siiyo Ardayda iyo Sinaanta. Inta aan u diyaar garoobayno sanad dugsiyeedka 23 - 24, wakiilo ka socda hogaanka DPS ayaa kala shaqayn doona [kooxda Harvard PELP](#) si loogala shaqeeyo degmooyinka kale ee waawayn ee dugsiyada Maraykanka si loo dhiso istaraatiijiyadaha adkaynta anshaxa ardayga, xeerarka edbinta, iyo la falgelida.
- Diiwaan Gelinta Ardayda <Xaaladaha Dugsiga>
 - Waxbarashada bilaashka ah ee haboon waa xuquuqda aasaasiga ah oo xaqiijinaysa in si siman loo helo waxbarasho ayadoo aan cidna la takoorin, ayadoo aan laga eegayn shaqsiyada qofka, awoodaha, ama xaaladaha.

Khulaasada Xogta iyo Fikradaha La dhiibtay

[Halkaan ka eeg dhammaan xogta iyo fikradaha laga soo uruurshay Nuqulka 1.0.](#)

[Halkaan ka akhri Nuqulka 2.0 ee Qorshaha Badqabka Hawlgalka.](#)